



Suspension factsheet: supporting your child's wellbeing

Parent/carer information

Warqada xaqiqda ee Cayrinta: Taageerida fayoqabka ilmahaaga

Maclumaadka xannaaneeyaha/waalidka

Sidii aad u taageeri lahayd ilmahaaga

Meel wanaagsan oo aad ka bilaabi kartid markaad taageeraysid ilmahaaga fayoqabkiisa iyo caafimaadkiisa inta lagu jiro dugsi ka joojinta waa in la soo ururiyaa maclumaad khibrad leh iyo tallo. Wixii ah tallo ficiil ah iyo maclumaad lagu taageerayo ilmahaaga fayoqabkiisa eeg ilaha maclumaadka bogga soo socda:

- Fayoqabka ([Wellbeing](#))

Wadahadal wanaagsan oo furan una dhaxeeya guriga iyo dugsiga wuxuu caawinayaa inuu siiyo ardeyda fursada ugu fiican ee ay ku guuleysan karaan.

- Deji ilmahaaga inay yihiin xubin qiimo leh oo ka mid ah bulshada dugsiga.
- Kala hadal wixii aad saluugto dugsiga
- Si shirkow ah ula shaqee kooxda dugsiga si ay u sameeyaan oo ay u dhaqan geliyaan istaratijiyado taageeraya hawlgalka ilmahaaga ee waxbarshada dhexdeeda.
- Tag kulanka xalka dugsi ka joojinta ilmahaaga. ee ilmahaaga. Waxaa laga yaabaa in loo qabto si ka fool ka fool ah, online ama taleefan iyadoo la isticmaalayo qaabka fursada ugu fiican ee wadahadalka wanaagsan leh.
- Kala hadal ilmahaaga dabeeecada haboon ee qaabeysa jawiga waxbarasho xushmad leh, amaan,dhammaan lagu wada jiro oo ixtiraam leh, jawi amaan ah oo waxbarasho.
- Ku dhiirigeli ilmahaaga inuu si firfircooni ula wadaago fikradahooda iyo rayigooda si xushmad badni leh.

Guriga wax ku barashada intaad ku maqan tahay dugsi ka joojinta

- Xubin ka mid shaqaalaha ayaa si joogta ah kula soo xiriiri doona adiga iyo ilmahaaga inta lagu jiro xilliga dugsi ka joojinta.
- Caawi ilmahaagu inuu barto u dejinta wakhtiyoo cad cad oo ah xilliyada shaqada inta lagu jiro maalinta, helida meel degan iyo weydiinta sida waxbarashadoodu u horumarayso.
- Waa inaad hubisaa inay helaan nasasho, biyo cabaan iyo inaad taageerto haddii culeys fuulo ama welwel.
- U ogolow wakhtiga nashaadka jirka loogu talagalay.
- Kormeer ilmahaaga si uu tignoolajiyada si amaan ah ugu isticmaalo. Istimmaalida tignoolajiyada bogga ([Using technology](#)) wuxuu leeyahay maclumaad iyo ilo maclumaad oo laga yaabo inaad ka hesho wax faa'iido leh.

Xiriiro Caawimaad fiican leh

- Xirmooyinka waxbarshada ([Learning packages](#))
- Tallada taageerada leh iyo waxbarashada Naafada ([Disability learning and support advice](#))
- Qalabka taageerada dabeeecada: taageerada waalidka loogu talagalay ([Behaviour support toolkit: support for parents](#))
- Caawinta ilmahaagu inuu guriga wax ku barto ([Helping your child learn from home](#))
- Khadka Taleefanka Carruurta ([Kids Helpline](#)) waa adeega la talinta taleefanka bilaashka ah keliya ee Australia dadka dhalinyarada ah ee jira 5ta ilaa 25. Ka wac 1800 55 1800.

Adeega turjumaanka taleefanka

Haddii aad dooneysid inaad la xiriirtid dugsiga oo aad caawimaad uga baahan tahay Ingiriiska fadlan ka wac adeega turjumaanka taleefanka 131 450, u sheeg luuqadaad u baahan tahay oo weydii xiriiriyyaha inuu waco dugsiga. Xiriiriyyaha ayaa turjumaan khadka soo gelin doona kaa caawiya wada hadalkaaga. Adeegan lacag lagaama qaadi doono.